



Ka hortaga dhicitaanka



Ilmahaaga sii dhul banaan oo amaana oo ilmahaagu ku cayaaraan guriga dhexdiisa isticmaal galaaska amaanka ama Safety Glass Film. Dabool geesaha wax mudi kara ee miisaska iyo kurisga dheer ee lagu wada fariisto.

Sariiraha la isa saaraa amaan uma aha carruurta ka yar 9 sanadood.



Kursiga ilmuhu ku socdo amaan maaha sababtoo ah ilmuhu si degdeg ah ayuu u geli karaa meel khatar ah.



Ka qaad aqalka dhexdiisa waxyaallaha ilmaha kufin kara oo ay ka midka yihiin tooyiska, gogo sha iyo xargaha korontada.



Had iyo jeer isticmaal kan ilmaha lagu xir markuu saaran yahay baraamka, waxyaallaha lagu riixo carruurta iyo tarooliga suuqyada.



Isticmaal xayndab si aad uga hortagto dhicida.



Nalka habeenimo waa ka hortegi karaa dhicida.



Amaanka Biyaha



Carruurta waxay si degdeg ah ugu hafan karaan sentimitiro yar oo biya ah.



Qof weyni waa inuu had iyo jeer la joogaa carruurta waqtiga qubayska.



Harada qubayska in deyr lagu xiraa waa lagama maarmaan. Ka qaad dhamaan waxyaallaha u dhow deyrka si looga hortago in carruurta ka dhacdo deyrka.



Had iyo jeeraale carruurta la joog markay biyaha ku dhow yihiin.



Had iyo jeeraale faaruqi harada dabaasha kana qaad qalabka dabaasha marka la isticmaalo ka dib.

Baaldiyada naabiga waa inay leeyihiin dabool adag lana saaraa meel kore.



Amaanka guriga dibadiisa



Xash dhumucdiisu hoose gaarays 300mm ayaa aamin ah in si sahlan lagu soo dego.



Waa muhiim in goobaha carruurta ku cayaarto oo dhan si joogta ah loo dayactiro.



Meelaha baabuurta marto ama dhigato ha ka dhigin meel lagu cayaaro.

Had iyo jeer kormeer carruurta eyga ag joogta. Waa muhiim in eyga la siiyo tababarka mudeecnimada.



Fuulida cagafcagaf, caws jare ama caws sime, iyo kuwa isjiidayaa carruurta khatar ayey u yihiin.



Ka hortegida sumoobida



Daawooyinka ayaa ah kuwa ugu badan oo sababa in carruurta yaryari sumooto (sunta ilmuhu cabo ama laqo).

Badanaa sumoobidu waxay dhacdaa marka daawo looga tago meel carruurta gaari karto ama marka awoowayaasha ama ayeeyooyinka daawadooda la gaari karo.



Ku dhaaf dhamaan kiimikada, daawooyinka iyo waxyaallaha wax lagu dhaqo weelka markii hore lagu keenay.

Had iyo jeer geli kiimikada, daawooyinka iyo waxyaallaha wax lagu dhaqo meel carruurta aanay furi karin.



Qalabka carruurta lagaga xiro meelaha la furi karo ayaa lagu dhejin karaa armaajooyinka badankood.



Saabuunta alaabta lagu dhaqaa waa khatar haddii la laqo.



Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu laqay waxyaallo sun ah is deji. Weelka waxaasi ku jiro qaado dabadeedna wac Telefoonka Xarunta Macluumaadka Sunta 131 126.



Wac 24ka saacadood, 7da berri ee asbuuca.



Ka hortaga dab gubashada iyo biya ku gubashada



Ka fogay carruurta yaryar cabitaanka kulul iyo meelaha mashquulka ah ee wax lagu kariyo.



Ka fogay xariga kirliga meel carruurta gaarto isticmaalna kirliga aan xariga lahayn.

Ha ka tegin wax karsamaaya.



Nadiifi fiiltarka mishiinka dharka qalajiya mar kast oo la isticmaasho.

Had iyo jeer isticmaal wax carruurta lagaga gudbo kulayliyaha. Bar carruurtaada yaryar ISTAAG, DHIG, DABOOL iyo GALGALO haddii dharka dab qabsado.



Dooro dharka lagu seexo oo khatartooda dabku hoosayso. Dooro dhar lagu seexo oo ku leg.

Hubi in aallada dabdemisku shaqaynayso asbuuc walba. Nadiifi alaarmiga bil walba. Bedel beteriga sanad walba.



Dabool barta korontada si aan korontadu u qabsan ilmaha.

Meelaha gubtay biya qabow geli una daa 15-20 daqiiqo.



Xaalladaha degdega ah wac 000 Booliiska, Ambalansida iyo Dabdamiska.



Mergashada iyo neef-ku-dhigida



Cuntooyinka waa lagu mergan karaa: tufaaxa, selariga, kaarootada, natiska iyo lafaha. Ha siin lawska carruurta ka yar shan sano.

Karootada iyo tufaaxa googoo, burburi ama kari si aad hoos ugu dhigto khatarta mergashada.



Had iyo jeer carruurta ku dhiirigeli inay si degan u fariistaan markay wax cunayaan.

Carruurta ka yar saddex sano wax walba oo geli kara baakada filimka way ku saxan karaan. Joogto isaga u hubi inay tooyiska ku jiraan qayba debecsani.



Si hoos loogu dhigo khatarta dhimashada lama filaanka ah ee carruurta ka fogay tooyiska sarriirta ilmuhu ku seexdaan, weelka iyo barkinta oo had iyo jeer ilmaha u seexi dhabarka. Xaqiiji in sarriirta aan la dhigin daaqada agteeda meel carruurta ka gaaraan xariga daaha.

Baacuhu waa khatar. Had iyo jeer isku gunud ka hor intaadan tuurin.

